# Warbixin ku saabsan Madasha [Dexter] oo loogu talagalay xilhaayeha xannaanadda/waalidka

## Waa maxay [Dexter]?

[Dexter] waa hab-dhis is-gaarsiin ku salaysan, oo ay adeegsadaan maamulka iskullada iyo qoysaska. Warbixinta laga helo xafiiska iskuulka badideeda waxaa laga aqrisan karaa Madasha [Dexter].

Xilhaayeha xannaanadda/waalidka ardayda dugsiyada biloowga/hoose/dhexe ee Dowladda hoose Östersund maamusho, waxay Madasha [Dexter] ku leeyihiin akawnt. Kaddib markii madasha guda-gasho, waxaad aqrisan kartaa warbixin guud ahaan iskuulka ku saabsan, iyo warbixin-shaqsiyeed adiga ama ilmahaaga gaar ahaan ugu saabsan. Madasha siyaabo kala duwan ayaa lagu haga loona guda-geli karaa, marna suurtagal ma noqn karto inaad isha ku dhufato ama madasha ka aqrisato warbixin aan adiga ku khusayn.

## Hawlaha Madasha [Dexter]?

- Waxaad nagu wargelin kartaa xannuunka
- Waxaad aqrisan karta jadwalka
- Waxaad aqrisan karta liiska ka maqnaanshada
- Waxaad aqrisan karta liiska fasallada, kan shaqaalaha iwm

## Guda-gelista

Adigo adeegsanayo aqoonsiga digitalka ee loo yaqaanno [e-legitimation mobilt Bank-ID] ayaa guda-geli kartaa Madasha [Dexter], barta internetka ee laga helo waa ostersund.dexter-ist.com . Sidoo kale xiriiriyeyaasha Madasha [Dexter] waxaa kaloo laga hela barta internetla www.ostersund.se.

Haddii aadan haysan aqoonsiga digitalka ee loo yaqaanno [e-legitimation mobilt Bank-ID] waxaad ku guda-geli kartaa magaca isticmaalaha [användarnamn] iyo password. Xogta noocaas ka dalbo maamulaha iskuulka ubadkaaga.

Kaddib markii aad guda gasho waxaa toos indhahaaga  ku dhici doonaan qaybta maamullida ”skrivbordet”. Liiska la soo jiidi karo ka xulo cunugga aad tusaale doonayso inaad jirro ku qorto ama aad doonasyo inaad warbixintiisa aqrisato.




Muqaalka 1aad. Miiska [Skrivbordet] qaybta maamullida ”skrivbordet”.

# Wargelinta ka maqnaanshada

Ka maqnaanshada waxaad nagu wargelin kartaa adigoo isticmaalo barta internetka iyo Madasha [Dexter] ama app-ka mobaylka Madasha [Dexter]. Sidaads ayaa xitaa xannuunka nagu nagu wargelin kartaa, sabab ahaan xulo ” Frånvaroanmäla ”. Ku qor taariikha ka maqnaanshada ay bilaabanayso iyo taariikhda ay dhamaan doonto kaddib jag-sii ”Spara”. Sidaas ayuu hageha/la taliyeha [mentor] iyo macalimiinta kale ugu war heli karaan sababta u ardaygu muddadaas iskuulka ugu maqanaa.




Muqaalka 2-aad. Diiwan-geli wargelinta ka maqnaanshada.

Waxaa suurtagal noqon karo wargelinta ka maqnaanshada ee qayb maalinta kamid ah. Haddii xog khalad ah aad diiwan geliso, waa ka tirtiri kartaa goobta, waa haddii aad sameeyso kahor inte macallinku u san ka diiwangelin casharradiisa.

# Faahfaahinta xiriirka

Faahfaahinta xiriirka sida adreeska waxaa laga soo xigsada buugga diiwan-gelinta dadwaynaha [folkbokföringen] toosna looga beddeli karo iyadoo Madasha [Dexter] la adeegsanayo. Laakin halka ay ku yaalaan ereyada ”Min profil” ku xigta ” Ändra

kontaktuppgifter” waxaad ka beddeli kartaa lambarka taleefanka iyo adreeska -e-mailkaaga.




Muqaalka 3-aad. Hoosta halka ay ku qoran yihiin ereyada "Mina kontaktuppgifter" ka beddel lambarka taleefanka iyo adreeska e-mailka.

Waxaad kalo halkaas ka xulan kartaa haddii aad doonayso in lagu wargelio markii ubadkaaga u sabab la'aan casharrada ka maqnaa.




Muqaalka 4. Wax ka beddelka qaabka ogeysiiska

Lambarka mobaylka ee saxa ah wuxuu gaar ahaan muhim ugu yahay sidii farinta SMS lagugu soo diri lahaa ogeysiisyada sida ka maqnaanshada sabab la'aanta ah.

# Wax ka beddelka passwordka

Kaddib markii aad madasha [Dexter] guda gasho waxaad beddeli kartaa xogta passwordka. Guud-marka appka/barnaamijka ka xulo”Min Profil” kaddib ”Min Profil”. Jag-sii ” Ändra lösenord”. Xulo password oo ugu yaraan ka kooban 6 xarfo iyo lambarro. Ha isticmaalin xarfaha å, ä ama ö waayo kuma shaqaynayaan appka Madasha [Dexter] ee ka maqnaanshada.

Islamarkaas fursadda ka faa'iidayso, adigoo xusho taariikhda tusida ka maqnaanshada. Taasoo ku suurtagelin doonto in goor dambe, ka xulato ka maqnaanshadihii berri hore ama taariikhdooda la soo dhaafay, beddelka toddobaadyada adiga ayaa xulan kara sida taariikhda ay kala horeeysay.




Muqaalka 5:aad. Wax ka beddelida passwordka iyo qaabka tusmada taariikhda ka maqnaanshada.

# Arrimaha kale

## Taxadar xiriirka la leh xogta aan saxda ahayn

Markii iskuulka u bilaabanayo badi ahaan waxaa dhacdo in aan laga gaarin diiwan gelinta dhammaan isbeddelada hirgaleen, sidaas awgeed naga raali ahaada haddii biloowga aynan wax kasta sax ahayn.

## Support/caawinaad

Haddii iskaaga aadan xal ugu heli karin cilladaha Madasha [Dexter], waxaad caawinaad darteeda la xiriirta xafiiska iskuulka iyaga kaddib ku gudbinayo halka aad caawinaad ka heli lahayd.

## Haddii passwordka iloowdo

Haddii aad haysato aqoonsiga digitalka ee loo yaqaanno [e-legitimation - mobilt Bank-ID] waxaad Madasha [Dexter] ku guda-geli kartaa adigoo aqoonsigaas adeegsanayo, xaaladdaas xog kale uma baahnid.
Haddii aqoonsiga digitalka ee loo yaqaanno [e-legitimation - mobilt Bank-ID] aadan haysan la xiriir maamulaha iskuulka ubadkaaga, kaddib password cusub ayaa lagu soo dirin doonaa. Kaasoo lagu soo hagaajin doono adreeska rasmi ahaan aad ka diiwan gashan tahay.

ÖSTERSUNDS KOMMUN
STAAREN TJÏELTE

# Hab-maamuleed arrimaha amniga xogta kombyuutarrada ku qoran [GDPR - General Data Protection Regulation]

Madasha [Dexter] waxaa lagu soo bandhiga xogta ku qoran hab-dhiska diiwanka ardayda iskuulka. Hab-dhiska waxaa laga diiwan geliya xogta u maamulka iskuulka u baahan yahay gudashada hawlgallada maamulida awgeed, sida tusaale faahfaahinta xiriirka iyo buugga shahaadooyinka.